Gobalku waxa dhici karta in uu qaaddacaad saro qoyska haddii xubin uu jabiyo xeerarka Barnaamijka Child Care Assistance midkood. Qaaddacaadda waxa ay soconaysaa illa hal sano marka koobaad ee been-abuur la sameeyo, labo sano been-abuurka labaad, iyo daa'iman been-abuurka saddeexaad. Qofkii bixiya macluumaad been ah si ay iyaga ama qof kale u helo Caawimada Xannaanada Ilmaha waxaa lagu xukumi karaa dambi-fal.

Haddii gargaarka daryeelka caruurta la i siiyo waxa aan fahamsanahay in:

- Ay shardi tahay in aan la shaqeeyo adkaynta masruufka caruurta iyo qaybtayda masruufka daryeelka caruurta aan ku wareejiyo Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (Minnesota Department of Human Services). Waxa aan xaq u leeyahay in aan "sabab jirta" cuskado haddii aanan la shaqayn adkaynta masruufka caruurta.
- Waxaa dhici karta in aan qayb-bixin urajda ah aan bixiyo.
- Haddii dearyeelahayga caruurta uu igu soo dallaco cadadka u sarreeya ee degmada laga bixiyo mid ka saarreeya, waxa aan bixin doona kharashka dheeraadka ah, iyo xitaa qayb-binta ujradayda.
- Waa in aan soo sheego wixii isbaddala ah ee macluumaadka aan bixiyay muddo 10 cisho gudahood ee maalmaha taariikhda uu isbaddalka dhacay. Kuwaas waxaa ka mid ah isbeddelka ku yimaada shaqada iyo xaaladda howlaha iyo jadwalka, xaaladda qoyska, isbeddelka dakhliga ee weyn, cinwaanka ama degenaanshaha, ama qof kasta oo u soo guuraya ama ka guuraya gurigeyga. Tixraac [Waajibbaadka Soosheegidda ee qoysaska CCAP \(DHS-6953\)](#) wixii shuruudaha gaarka ah.

- Waxaa shardi ah in aan siiyo hay'adda degmada iyo daryeelahaygu caruurta muddo 15 cisho ee ogoaysii kahor inta aanan baddalin daryeelahayga/daryeelayaasha caruurta. Ogaysiiskan looma baahna marka ay jiraan xaaladda sida:
 - Liisanka Minnesota ee bixiyaha daryeelka xanaanada caruurta ayaa si kumeel gaar ah oo kedis ah loo joojiyay ama
 - In ay jirto halis deg-degga ee caafimaadka, ammaanka, ama xuquuqda canugga ee uu daryeelaha ee aan shatiga Minnesota haysan.
- U qalmiddayda Child Care Assistance waa in dib lagu qiimeyo ugu yaraan laba iyo tobankii (12) biloodba.
- In aan xaq u leeyahay in aan doorto mid kasta ee sharci u haysta daryeelka caruurta, ay ka midyihiin bixiyayaasha daryeelka caruurta ee shatiga leh iyo ku waa sharciga u leh ee daryeelayaasha caruurta ee waajibaadka barnaamijka waafaqaya.
- Haddii aan doorato daryeelaha caruurta waxa aan ka fakiray in aan la shaqeeyo loo shaqaaleeyaha bixiyaha iyo masuuliyadka sharciga iyo canshuurta. Daryeelkaan waan in ay ansixisaa DHS marka hore si gargaarka daryeelka caruurta lacagtiisa loo bixiyo.

Been sheegid iyo caddeymo guud

Waxa aan caddaynaya aniga oo og ciqaabta ay leedahay been ku dhaarashada in aan dib u eegay foomkan oo sida ugu wanaagsan ee aan u ogahay uu run yahay oo yahay hadal sax ah dhamaan macluumaadkan. Waxa aan fahamsanahay in qofka lagu qaaday dembiga been sheegid iyo caddeymo guuda ay dhici karto in lagu xiro wax aan ka badnayn shan sano ama uu bixiyo ganaax aan ka badnayn \$10,000, ama labadaba. [Minnesota Statute, section 256.984, subd. 1]

Marka hoos la saxiixo:

- Waxa aan caddaynayaa in la i siiyay nuqulka Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan (Notice of Privacy Practices) (DHS-3979, iyo Masuuliyadda iyo Xuquuqda Macaamilka (Client Responsibilities and Rights) (DHS-4163), iyo Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta iyo Khayaanada: Su'aalo iyo Jawaabo loogu talagalay qoysaska (DHS-3943B). Waan akhristay waana fahmay macluumaadkaan. Haddii aan su'aalo ka qabo waxaa macluumaadkaan ay ku taxaluqaan, waxa aan waydisan doonaa hawl wadeenka in uu iyaga ii sharaxo.
- Waxa aan oggolahay in aan ku wareejiyo masruufka daryeelka caruurta Gobolka Minnesota. Waxa aan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay sabab jirta oo aan kaga doodo gacansiin la'aanta adkaynta masruufka caruurta.
- Waxa aan oggolahay in aan macluumaadla ula wadaago sida ay ugu xusantahay siidaynta bixiyaha iyo u fasaxidda baaritaanka ee kore.

SAXIIXA CODSADAHA AMA WAKIILKA IDMAN		TAARIKHDA
SAXIIXA XAASKA/SEYGA AMA CODSADHA LABAAD		TAARIKHDA
AGENCY SIGNATURE	DATE	MACAAMIISHA LA SIIYAY: <input type="checkbox"/> Client Responsibilities and Rights (DHS-4163) <input type="checkbox"/> Notice of Privacy Practices (DHS-3979) <input type="checkbox"/> The Child Care Assistance Program and fraud: Questions and answers for parents (DHS-3943B)

AGENCY NOTES

Isticmaal booskan haddii aad u baahantahay boos dheeraad ah

Isticmaal booskan haddii aad u baahantahay boos dheeraad ah

Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta iyo Khayaanada: Su'aalo iyo jawaabo loogu talagalay qoysaska

Waa maxay Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta?

Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Ilmaha, oo mararka qaarkood loo yaqaan CCAP, wuxuu ka caawiyaa waalidiinta dakhligoodu hooseeyo inay bixiyaan daryeelka carruurta si ay u shaqeeyaan, iskuul u aadaan, ama u raadsadaan shaqo, waxayna ka caawineysaa hubinta in carruurta si fiican loo daryeelo oo ay diyaar u yihiin inay bilaabaan iskuulka iyaga oo diyaar u ah in ay wax bartaan.

Waa maxay Sharciyada Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta?

Uma baahnid inaad isticmaasho kaalmada daryeelka carruurta, laakiin haddii aad isticmaasho, adiga iyo bixiyaha daryeelka caruurtaadu waa inaad raacdaan sharciga. Ku guuldaraysiga in sharciga daryeelka caruurta loo hogaansamo waxay sababi kartaa in lala kulmo cawaaqib halis ah. Qaar ka mid ah sharciyadaas ayaa hoos ku taxan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan sharciyadan, la soo xiriir shaqaalaha gargaarka daryeelka carruurta.

Maxaan u baahanahay in aan u sheego howl-wadeenkayga?

Haddii aad isticmaasho gargaarka daryeelka caruurta, waa inaad isbedellada qaarkood u soo sheegto howl-wadeenka daryeelka caruurtaada 10 maalmood gudahood taariikhda isbedelka. Macluumaad dheeri ah, ka eeg mas'uuliyadaha Warbixinta Qoysaska Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta ([DHS-6953](#)).

Haddii aadan ku soo gudbinin isbedellada loo baahan yahay 10 maalmood gudahood, waxaa laga yaabaa inaad dib u soo celiso lacagtii lagu bixiyey gargaarka daryeelka caruurta.

Markii lagaa codsado, waa inaad u gudbiso cadaynta dakhligaaga dhabta ah howl-wadeenkaaga gargaarka daryeelka carruurta. Waa sharci darro in aad jeegagga mushaharka oo ka duwan wixii aad dhab ahaan shaqaysay u soo gudbiso howl-wadeenkaaga gargaarka daryeelka caruurta la-taliyaha shaqada, iyo/ ama gobolka/qabaailka aad ka qaadato gargaarka.

Barnaamijku ma bixin karaa maalmaha uusan ilmahaagu tegin goobta xanaanada carruurta?

Haa, laakiin waxaa jirta xadidaad dhanka waxa u bixin karo gargaarka daryeelka caruurta. Waa inaad keentaa ilmahaaga goobta daryeelka caruurta xiliga loo qorsheeyay inay halkaas joogaan. Haddii ilmahaagu joojiyo imaanshaha goobta daryeel bixiyaha ama u baahan yahay daryeelka xanaanada oo kooban, u sheeg howl-wadeenka daryeelka caruurta. **Waa sharci daro in bixiyaha daryeelka caruurta uu ku soo dallaco Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta maalmo uusan ilmahaagu tegin oo aan ka ahayn haddii bixiyaha daryeelku uusan u soo dallacin in ay yihiin maalmaha maqnaanshaha ama feestooyinka.**

Maalmaha maqnaanshaha

Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta ayaa bixin doona ilaa 25 maalmood oo maqnaansho ah ilmo kasta, sanad kasta (ama 10 maalmood oo isku xigta). Barnaamijku lacag kama bixin doono maalmaha maqnaanshaha ee daryeelayaasha goobaha daryeelka ee aan shatiga lahayn (LNL).

Caruurta leh xaalado caafimaad oo la xaqiijiyey, ama cudurro sababa maqnaansho soo noqnoqda, ayaa ka badan kara xadka 25 maalin ee maqnaanshaha ah iyo xadka 10ka maalmood ee isku xigta. Xaaladahan caafimaad ama cuduradan waa in la diiwaangeliyo Foomka Diiwaangelinta Xaaladda Caafimaad ee CCAP (CCAP Medical Condition Documentation Form) ([DHS-4602](#)).

Marka maalmaha maqnaanshaha la wada isticmaalo sanadka gudhihiisa:

- Qoyskaaga ayaa sii wadan kara helitaanka gargaarka daryeelka caruurta
- Gargaarka Daryeelka Caruurta ayaa bixin doona maalmaha ilmahaagu aado daryeelka xanaanada caruurta
- Gargaarka daryeelka caruurta ma bixin doono maalmaha marka ilmahaagu uusan aadin goobta daryeelka caruurta

- Qoyskaaga ayaa mas'uul ka ah in uu bixiyo kharashka maqnaanshaha ee gargaarka daryeelka caruurta uusan bixin.

Haddii ilmahaagu maqnaado qayb maalinta ka mid ah, lacagta la siinayo maalintaas waxay noqon doontaa qadarka daryeelka xanaanada ee loo qorsheeyay maalintaas, oo maalintaas looma xisaabin doono in ay ka mid tahay xadidka 25 ka maalmood ee maqnaanshaha.

Feestooyinka

Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta ayaa bixin doona ilaa 10 maalmood oo feesto ah sanadkii haddii:

- Haddii goobta bixiyaha xanaanada caruurta uu **xiran yahay** IYO
- Feestadu ay kusoo hagaagtay maalin ilmahaaga loo ogolaaday oo loo qorsheeyay inuu aado/xaadiro goobta daryeelka caruurta.

Diiwaanada imaanshaha

Diiwaanada imaashuhu waa inay ahaado diiwaan run ah maalmaha iyo saacadaha ilmo walba uu yimaado kana baxo goobta bixiyaha xanaanada caruurta.

Diiwaangelintu waa inay ku jirtaa taariikhda adeega, ilmo kasta magaciisa koowaad iyo ka dambe, iyo wakhtiga uu soo galay iyo wakhtiga uu ka baxay. Maalin kasta oo ilmuhu yimaado, qofka keenaya ama qofka qaadaya ilmuhu waa inuu ahaado ka saxeexa imaatinka iyo bixitaanka ilmaha.

Ma heli karaa kaalmada daryeelka ilmaha haddii aan iskay u shaqaysto?

Haa, kaalmada xanaanada caruurta waxay caawin kartaa waalidiinta iyagu iskood u shaqeysata ama leh ganacsigooda gaarka ah illaa iyo inta:

- Qoysku uu buuxiyo dhammaan shuruudaha Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caruurta, oo ay ku jiraan shuruudaha dakhliga, IYO
- Inta ay waalidku u baahan yihiin xanaano caruur waqtiga ay shaqaynayaan.

Ma heli karaa kaalmada xanaanada carruurta haddii aan ka shaqeeyo xarun daryeelka xanaano caruurta ah?

Haa, laakiin Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta ma bixin karo wax ka badan 25 carruurta shaqaalaha ah in ay aadaan goobta daryeelka caruurta ee uu waalidkood ka shaqeeyo. Sharcigan wuxuu quseeyaa xarumaha shatiga leh iyo kuwa shatiga laga dhaafay labadaba. Waalidku waxay ka shaqayn karaan xarunta daryeelka caruurta ee aysan caruurtoodu dhiganin. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sharcigan, ka eeg Bixinta Lacagta Barnaamijka Daryeelka Caruurta Shaqaalaha Xarunta - Su'aalo iyo jawaabo loogu talagalay Waalidiinta ([DHS-6960C](#)).

Maxaa dhacaya haddii aanan u hogaansamin sharciga?

Ku guuldaraysiga in sharciga daryeelka caruurta loo hogaansamo waxay sababi kartaa in lala kulmo cawaaqib halis ah sida:

- Waayitaanka gargaarka daryeelka caruurta
- In loo baahdo in dib loo soo bixiyo lacagtii uu bixiyey Barnaamijka Kaalmada Daryeelka, iyo/ama
- Go'aaminta khiyaanada (hoos ka fiiri macluumaad dheeri ah).

Waa maxay khiyaanadu?

Khiyaanadu waa marka aad si ula kac ah u dowlada u siiso warbixin been ah si aad u hesho caawimaad dadweyne adigu ama qof kale. Gargaarka bulshada waxaa ka mid ah barnaamijyada sida gargaarka daryeelka xanaanada carruurta, kaalmada lacagta, SNAP iyo Gargaarka Caafimaadka.

Aad ayey muhiim u tahay inaad bixiso macluumaad **run ah, dhammaystiran oo hadda ah oo** ku saabsan qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan. Macluumaadkan ayaa waxaa loo isticmaali doonaa in lagu go'aamiyo caddadka gargaarka aad heli doonto. Haddii howl-wadeenkaagu ogaado in macluumaadka aad bixisay uusan ahayn run, waxaad halis ugu jirtaa inaad lumiso nacfiyada kaalmada bulshada mustaqbalka waxaadna la kulmi kartaa ciqaabo kale oo culus.

Ogow waxa aad saxiixayso

intaadan magacaaga ku saxiixin arji ama foom, si taxadar leh u akhri. Hubso inaad bixinayso macluumaad run ah oo kusaabsan naftaada, xaaladdaada iyo dhamaan isbedellada nololshaada.

Ganaaxyada khiyaanada

Haddii aad khiyaanada samayso, waxaad waayi kartaa xuquuqda aad u leedahay inaad mustaqbalka hesho nacfiyada. Waxa kale oo laga yaabaa in aad:

- In aad dib u soo bixiso lacagtii ama nacfiyada gargaarkii dowladeed ee si khalad ah aad ku heshay
- In aad ganaaxyo dheeraad ah maxkamada siiso
- Aad xabsi ama jeel gasho.

Sideen u soo sheegi karaa khiyaanada?

Dadka aan daacada ka ahayn macluumaadka la xiriira nacfiyada gargaarka dadweynuhu waxay u soo jiidaan dhibaato weyn naftooda iyo dadka kaleba. Haddii aad u malaynayso inuu qof khiyaamaynayo ama jabinayo sharciga, fadlan naga caawi in aad noo soo sheegto. Si aad u soo sheegto khiyaanada aad tuhunsan tahay, lasoo xiriir Waaxda Adeegyada Aadanaha Khadka soo Gudbinta Khiyaanada ee Tooska ah:

- 800-627-9977 wicitaan lacag la'aan ah wixii ka baxsan aagga Magaalooyinka Mataanaha ah
- 651-431-3968 Magaalooyinka Mataanaha ah dhexdooda
- Khadka Internetka oo ah <https://fraudhotline.dhs.mn.gov>

Khasab kuguma aha inaad sheegto magacaaga markii aad soo gudbinayso khayaano.

Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan

(Taariiqda La Hirgalinayo: Noofembar 2016)

Ogaysiiskan wuxuu sheegayaa sida loo isticmaalayo macluumaadka gaarka ah ee adiga kugu saabsan iyo sida loo siidaynayo iyo sida aad ku heli karto macluumaadkan. Fadlan si taxadar leh u eeg.

Maxay tahay sababta aan macluumaadkan kuu weydiinayno?

- Si loo go'aamiyo in aan ku caawin karno iyo sida aan kuu caawin karno, ayaan macluumaad u soo aruurinaa:
 - Si aan laguugu qaldin dadka kale ee aad isku magac tihii ama isu magac egtihii
 - Si loo ogaado waxa aad u qalantid
 - Si laguugu caawiyi in aad heshid adeegyada caafimaadka, kuwa dhimirka, kuwa dhaqaalaha iyo kuwa bulshada iyo si lagu go'aamiyo in aad adeegyada qaarkood iska bixin kartid
 - Si aan u go'aamino in adiga ama qof qoyskaaga ah u baahan yihiin adeegyada ilaalinta
 - Si aan u go'aamino daryeelka ku haynta guriga meel ka baxsan ama ku haynta guriga dhexdiisa ee adiga ama carruurtaada
 - Si loo baaro saxsanaanta macluumaadka ku qoran arjigaaga
- Marka aan bilowno inaanu adeegyo ama taageero ku siino kadib, waxaa laga yaabaa inaanu soo aruurino macluumaad dheeraad ah:
 - Si aan u samayno warbixinno, cilmi baaris, xisaabin, iyo qiimeynta barnaamijyadeenna
 - Si loo baaro waxbixinada dadka laga yaabo inay been ka sheegaan caawimada ay u baahan yihiin
 - Si aan lacag uga soo aruurino hay'adaha kale, sida kambaniyada caymiska, haddii ay tahay inay bixiyaan daryeelkaaga
 - Si aan lacag uga soo aruurino hay'adaha dawlada gobolka ama federaalka si aan kuu caawino
 - Marka ay duruufahaaga/xaaladahaaga ama duruufaha qoyskaagu isbeddelaan ee lagaa rabo inaad soo sheegto isbeddelka (Mas'uulyadaha iyo Xuquuqda Macaamilka - DHS-4163)

Maxay tahay sababta aan kugu weydiinayno lambarkaaga Social Security (Sooshaal Sikuuradka)?

Waxa aan u baahannahay lambarkaaga Social Security si aan kuu siinno gargaarka caafimaadka, qaar kamida caawimaadda dhaqaalaha ama lagu fulinayo adeegyada masruufka caruurta (42 CFR 435.910 [2006]; Minn. Stat. 256D.03, subd.3(h); Minn. Stat. 256L.04, subd. 1a; 45 CFR 205.52 [2001]; 42 USC 666; 45 CFR 303.30 [2001]). Waxaa kale ee aan u baahannahay lambarkaaga Sooshaal sakuuratiga si lagu xaqiijiyo aqoonsiga iyo looga hortago in ay cid kale qaadato waxtarka gobolka ama kuwa federaalka. Waxaa intaa dheer, in lambarkaaga Sooshaal sakuuratiga loo isticmaalo raadin kumbiyuutar si loogu barbardhigo macumaadka hay'adaha iskaashiga, kuwa samafalka iyo kuwo gaar ahaaneedba kaa hayaan si lagu caddeeyo daqliga, ilaha, ama macluumaad kale ee saamayn ku yeelan kara u qalmiddaada iyo/ama waxtarka.

Uma baahnin in aad na siiso lambarkaaga Sooshaal sakuuratiga oo soo gubdisid:

- Dad gurigaaga deggan ee aan dalbanayn adeegyada
- Haddii xaalaado diini awgood aad uga gaabsanaysid
- Haddii aadan ahayn muwaddiin Maraykan ah oo dalbanayso Emergency Medical Assistance (Gargaarka Dawaynta Deg-degga ah) ah kaliya
- Haddii aad ka timid waddan kale, oo aad Maraykanka u joogto si ku meelgaar ah oo aadan ogolaansho ka haysanin hay'adda Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka Maraykanka (United States Citizenship and Immigration Services) si aad si joogto ah ugu noolaato Maraykanka
- Haddii aad ku nooshahay Maraykanka iyada oo aysan ku ogayn ama kuu ogolaanin hay'adda Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka Maraykanka (United States Citizenship and Immigration Services)

Ma shardi baa in aad ka jawaabto su'aalaha aan ku weydiinayno?

Qasab maaha in aad na siiyo macluumaadkaaga kuu gaarka ah. Haddii aan la haysan macluumaadka, waxa dhici karta in aanan ku caawimi karin. Haddii aad si kas ah nagu siiso macluumaad qalad ah, baaris iyo dambi ku oogid been abuura ayaa laguugu samayn karaa.

Yaan macluumaadka la wadaagaynaa?

Waxa kaliya macluumaadka adiga kugu saabsan la wadaagaynaa markii loo baahdo ama marka uu sharciga farayo. Waxa dhici kara in aan macluumaadkaaga la wadaagno hayadaha soo socda ama dad u baahan macluumaadka si ay hawlahooda ku fuliyaan:

- Shaqaalaha ama tabarrucyaasha kale ee gobolka, degmada, dawladda hoose, dawladda federaalka, hay'adaha iskaashiga, kuwa samafalka iyo kuwo gaarka ah
- Baareyaasha, hantidhowrayaasha, indhoindheyayaasha, iyo kuwo kale ee dib u eegidda daryeelka tayada leh iyo cilmibaarista sameeya amaba bilaabiya sharci marinta ama tallabooyin sharci ee la agaasinka barnaamijyada adeegyada aadanaha
- Saraakiisha maxkmadda, xeer ilaaliyaha degmada, xeer ilaaliyaha guud, saraakiisha hayadaha kala ee ammaanka, saraakiisha masruufka caruurta, iyo baarayaasha ilaalinta caruurta iyo been abuurka
- Xafiisyada adeegyada aadanaha, ay ku jiraan xafiisyada fulinta masruufka caruurta
- Hayadaha gobollada kale ee maamula barnaamijada dadweynaha loo qoondeeyey
- Bixiyaasha daryeelka caafimaadka, ay ku jiraan hayadaha caafimaadka dhimirka iyo rugaha dadka looga dawweeyo daroogada iyo qamriga
- Caamisyada daryeelka caafimaadka, hayadaha daryeelka caafimaadka, ururrada maamula daryeelka iyo kuwo bixiya qarashka daryeelkaaga
- Waliyada, xaafidyaasha ama dadka awood loo siiyay in ay ku metelaan
- Baareyaasha meeydka iyo caafimaadka xaqiijiyaa haddii aad dhimatid oo ay baarayaan geeridaada
- Shirkadaha baara amaahda aad qaadatid, kuwa wax amaahiya ama shirkadaha lacagta kala xaarira amaah aad bixin wayday adeegyada ujradooda lagugu leeyahay
- Cid kasta ee annaga uu sharciga na farayo in nalaga rabo ama aan siin karno macluumaadka.

Maxay tahay xuquuqdaada ku saabsan macluumaadka aan adiga ka hayno?

- Adiga iyo dadka aad u fasaxday ayaa eegi kara koobina ka samaysan kara macluumaadka caafimaadka ama kuwo kale ee gaara ee aan adiga kaa hayno. Lacag ayaa dhici karta in aad bixiso si aad koobi uga samaysato.

- Su'aalo ayaad naga weydiin kartaa haddii macluumaadka adiga kugu saabsan uu sax yahay. Dareenkaaga qoraal noogu soo gudbi. Noo sheeg sababta uu macluumaadka qalad ku yahay amaba aanu dhammaystirnayn. Noo soo dir fasiraaddaada ku taxluuqa macluumaadka aadan raalli ka ahyan. Waxa aan ku lifaaqayna fasiraaddaada markasta oo macluumaadka aan la wadaagno hayad kale.
- Xaq ayaad u leedahay in aad su'aalo nagu soo waydiisid qoraal ahaan si aan kuula wadaagno macluumaadka caafimaadka siyaabaha qaarkood ama meelaha qaarkood. Tusaale ahaan, waxa aad na weydiin kartaa in aan kuugu soo dirno macluumaadka cinwaanka meesha aad ka shaqayso halka aan kuugu soo diri lahayn gurigaaga. Haddii aan ogaanno in codsigaagu uu yahay mid caqli gala, waan kuu oggolaanaynaa.
- Xaq ayaad u leedahay in aad na weydiiso in aan xadidno ama mamnuucno sida aan macluumaadkaaga u isticmaalayno ama u siidaynayno, laakiin qasab naguma aha in aan oggolaanno codsigan.
- Haddii macluumaadka aadan fahmayn, hawladeenkaaga weydiiso in uu kuu fasiro. Waxa aad Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota ka codsan kartaa koobi kale ee ogaysiiskan.

Maxay yihiin masuuliyadaha na saaraan?

- Waa in xogta caafimaadkaaga aan dhawrno iyo macluumaadka kale ee kuu gaara sida ay qorayaan qawaaniinta ku xusan ogaysiiskan.
- Ma dhici karto in aanan macluumaadkaaga u isticmaalin sababo aan ahayn kuwa ku xusan foomkan ama macluumaadkaaga la wadaagno shaqsiyaad iyo hayado aan ahayn ku xusan foomkan waa haddii aadan adiga qoraal nagu siin in sidaas aan sameen karno.
- Waa in aan raacno qawaaniinta ogaysiiskan, laakiin waxaa dhici kara in aan baddalno sharciyada macluumaadka gaarka ah sababo la xariira sharciga macluumaadka gaarka oo la baddalay. Waxa aan isbaddalladan ku soo daabacayna Shabakaddeena oo laga helo: <http://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3979-ENG>

Waa maxay xuquuqda gaarka ee caruurta ay leeyihiin?

Haddii aad ka yartahay 18 sanadood, marka aan loo baahnayn oggolaashada waalidka sababo la xariira daawayn aad u baahatay, macluumaadka lama tusayo waalidka aan ka ahayn haddii bixiyaha daryeelka caafimaadku uu rumaynsanyahay in macluumaadka oo aan lala wadaagin ay halis u soo jiidi karto caafimaadkaaga. Waalidku macluumaadka kale ee adiga kugu saabsan ayay eegi karaan waxayna macluumaadkan tusi karaan dad kale, waa haddii uusan jirin codsi hore ee waalidka aan lagula wadaagayn. Waxaa shardi ah arrintan in aad qoraal ku weydiisato kuna sheegtid macluumaadka aadan doonayn in lala wadaago iyo sababta. Haddii ay hayaddu ay kugu raacdo in la wadaagidda macluumaadka aanu si weyn uga turjumayn maslaxaddaada, macluumaadka lala wadaagayo waalidkaagaa. Haddii aysan hayaddu raalli ka ahayn, waxaa dhici karta in macluumaadka lala wadaago waalidkaaga haddii ay ayaga sidaa soo codsadaan.

Maxaa dhacaya haddii aad rumaysantahay in xuquuqdaada gaarka kuu ah la jabiyay?

Haddii aad aaminsantaahay in Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota ay jabisay xuquuqdaada gaarka, waxa qoraal cabasha ah u diri kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeeg Aadanaha ee Maraykanka cinwaakeeda hoos ku xusan:

(Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota)

(Ku socota: Sarkaalka Arrimaha Asturan)

Minnesota Department of Human Services

Attn: Privacy Official

PO Box 64998

St. Paul, MN 55164-0998

Masuuliyadda iyo Xuquuqda Macaamilka

Xusuuso: Lacagta caddaanka ee ku jirta kaarka Xaawiladda Nacfiga (EBT - Electronic Benefit Transfer) waxaa loogu tala galay in lagu caawiyo qoysaska si ay u buuxiso baahidooda aassaasiga, oo ay ku jiraan: saldhigga baahiyahan waxaa ku jira cuntada, hoyga, dharka, biyaha, korontada iyo gaaska, iyo gaadidka. Dhaqaalahan waxaa la siinayaa qoysaska inta ay isku filnaasho ka gaarayaan. Waa sharci darro inaad ku iibsato ama isku daydo inaad ku iibsato tubaako ama khamri kaarkaaga EBT. Haddii aad samayso, waa khiyaano waxaana lagaa saarayaa barnaamijka EBT. Kaararka EBT sidoo kale looma isticmaali karo khamaarka ama xarumaha tafaariiqda ee bixiya madadaalada loogu talagalay dadka qaangaadhka ah ee ay bandhigayaashu dharka iska dhigaan ama ku jilayaan xaalad aysan dhar xirnayn oo madadaalo ah.

Masuuliyadahaaga

- **Hadii aad hesho lacag cadaan ah iyo/ama gargaar haynta ilmaha ah,** waa khasab inaad ugu soo sheegto isbedelada saameyn kara manfacydaada degmada (county) ama hay'ada qabiilka 10-cisho gudahood ka dib kolka arrintaasi ay dhacday. **Haddii aad hesho Nacfiyada Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Kabitaanka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program), ka soo war bixi isbeddelada 10-ka bisha xigta.** Barnaamij kasta oo nacfiyada ah ayaa laga yaabaa inuu leeyahay shuruudo kala duwan oo looga baahanyahay ka soo warbixinta isbeddelada. Soo wargali halwadeenkaada marka uu isbaddalku dhaco.

Waxaa dhici karta in lagaaga baahdo in aad soo sheegto isbaddalka:

- **Shaqada** - bilaabista ama joojinta shaqo ama ganacsi; isbeddelka saacadaha, dakhliga ama kharashyada
- **Dakhli** – la helay ama isbaddal ku yimid masruufka caruurta, Social Security, lacagta la siiyo askartii hore, caymiska shaqala'aanta, dhaxalka ama nacfiyada caymiska.
- **Hanti** – la soo gatay, iibka ama wareejinta guriga, gaari amawaxyaaba kale oo qiima leh ama haddii aad hesho dhaxal ama lacag maslaxo.
- **Xaalada qoyska** – haddii qof uu geeriyoodo ama uu naafo noqdo, guriga ka guuro ama u soo guuro ama si ku-meelgaara u tago; uur leedahay; canug uu dhasho.
- **Xaalada muwaadinnimada ama muhaajirnimada**
- **Cinwaanka**
- **Qiimaha guriyaynta ama kirada la kabo**
- **Qiimaha biyaha/korontada/gaaska**
- **Haynta ilmaha ee waalidka ama xaquuqda booqashada**
- **Xaalada guurka**

- **Dugsi la dhigto**
- **Caymiska caafimaadka iyo lacagta caymiska.**
- **Adiga ama qof qoyskaaga ka tirsan haddii uu ku guulaystay \$3,750 ama wax ka badan oo bakhtiyaanasiib ama khamaar ah.**

Waxaa kaloo dhici karta in lagaa rabo inaad soo sheegto hadii aad dacwo qaansheegad ah oo dhawaan la xareystay aad qayb ka tahay, ama lagugu helay dambi kabaa'ir ah oo maandooriye la xiriira.

Xusuusnow: Hadii aad iska diiwaan gelisay gargaarada haynta ilmaha (child care) aadna bedesho qolada ilmaha kuu haysa, waa khasab inaad ugu soo sheegto hawl-wadeenkaaga haynta ilmaha ugu yaraan 15-cisho ka hor inta aanu isbedelku dhaqan galin.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto ama aadan hubin wixii sharciga warbixinta ah, la soo xiriir shaqaalaha kiiskaaga. Haddii shaqaalaha kiiskaaga aan la heli karin, fariin u dhaaf si ay kuugu soo celiyaan.

- **Degmada, qabaailka, gobolka ama hay'adaha federaalka** waxay hubin karaan macluumaadka aad siisay. Si ay u helaan noocyada macluumaadka qaarkood, degmadu waa inay haysato ogolaanshahaaga oo saxeexan. Haddii aadan degmada u oggolaan in ay hubiso macluumaadkaada, caawimaad ma heli doontid.
- Haddii aad bixiso macluumaad aad ogtahay in uuna run ahayn, aad qariso macluumaad ama aadan soo u sheegin sida loogu baahanyahay, ama mar dambe la ogaado in macluumaadkaagu yahay mid aan run ahayn, waxaa laga yaabaa in lagugu sameeyo baaritaan khiyaano. Tani waxay keeni kartaa in lagaa joojiyo helitaanka nacfiyada, in lagugu soo oogo dembi, ama labadaba.

- Hay'adda xakamaynta tayada gobolka waxay si ku nasiibsi ah u dooran kartaa kiiskaaga si dib loogu eego. Waxa ay dib u eegi oraahda aad bixisay waxa ayna eegi inay xaq u yeeladkaaga si sax ah loo go'aamiyey. Waxay hubin doonaan in aad weli si sax ah ugu qalantid. Hay'adaha gobolka waxay macluumaad kale ka raadsan karaan ilo kale waxayna kuu sheegi doonaan waxa ku saabsan xiriir kasta oo ay doonayaan in ay sameeyaan. **Haddii aadan la shaqayn, nacfiyadaada waa lagaa joojinaya.**
- **Shuruudaha wada shaqaynta:**
 - Haddii degmadaada ama hay'ada qabaa'ilku kuu ogolaato Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (Minnesota Family Investment Program) ama Barnaamijka u Weecinta Shaqada, waa inaad la shaqayso dhammaan adeegyada shaqo ee loo baahanyahay, haddii aan lagaa dhaafin. Waa inaad samaysato oo aad la saxeexato qorshe shaqo hawlwadeenkaaga, haddii kale arjigaaga Barnaamijka u Weecinta Shaqada waa la diidi doonaa.
 - Waa khasab inaad la shaqeyso qolada masaariif u soo goynta ilmaha, manfacyada Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (Minnesota Family Investment Program) iyo/ama barnaamijka gargaarka ilmo haynta.

Haddii aad si toos ah masruufka ilmaha uga hesho waalid aan ilmaha haynin, waa inaad ku soo wargelisaa hawlwadeenka kiiskaaga.

Waxa ku sabsan Kaalmo Lacag Caddaan ah iyo Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP (Barnamijka Garagaarka Nafaqada Dheeraadka):

- **Mar kasta oo aad isticmaasho kaarka EBT ama aad saxeexo jeeggaga,** waxa aad sheegaysaa in aad ku wargelisay degmadaada ama hay'ada qabaa'ilka wixii ku saabsan isbeddellada xaaladdaada ee saamayn ku yeelan kara nacfiyadaada.
- **Mar kasta oo kaarkaaga EBT la isticmaalo,** waxaa loo aqoonsanayaa inaad heshay lacagta kaashka ah ama nacfiyada SNAP, aan ka ahayn haddii aad u soo sheegto degmadaada ama hay'ada qabaa'ilka in kaadhkaagii uu lumay ama lagaa xaday.

Gargaarka Daryeelka Caruurta:

- **Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo in adiguna aad qayb ka bixiso qarashka qofka ilmaha kuu haynaya ee daryeelka caruurta.** Haddii aadan bixin khidmada, gargaarkaaga haynta ilmaha ah waa la joojinayaa ilaa iyo inta khidmada oo buuxda laga bixinayo ama heshiis la isku af-garto oo khidmada lagu bixinayo lala gaaro degmada (county) ama qabiilka iyo bixiyaha adeega haynta ilmaha ah.
- **Waxaa dhici karta in loo baahdo inaad bixiso kharashaad kale oo dheeri ah** kolka uu bixiyaha adeega haynta ilmahu oo soo dalacdo lacag ka badan lacagta ugu badan ee ay degmadaadu (county) ama qabiilku uu bixiyo.
- **Waa inaad soo qortid** xaaladda socdaal ama muwaadinimo ee caruurta qoyskaada ee aad u codsanaysid kaalmada daryeelka.

Xusuuso: Haddii aad saxiixdo arjiga adigoo ah wakiil idman ee qofka codsanayaa ama gargaarka helaya, **waxa aad aqbalaysaa in aad qaadday masuuliyadaha oo idil ee kor ku taxan adigoo qofkaas ka wakiila.**

Xuquuqdaada

- **Xaqa aad u leedahay asturnaanta xuquuqdaada.** Macluumaadka asturan, oo ay ku jiraan macluumaadka caafimaadkaada, waxaa ilaalinaya shuruucda gobolka iyo federaalka. Shaqaalaha kiiskaaga ayaa wuxuu ku siiyay xaashida macluumaadka Ogeysiiska Dhacdooyinka Asturan (DHS-3979) oo sharxaysa xuquuqahan.
- **Xaq waxa aad u leedahay in aad dib u codsato** markasta oo nacfiyadaada joogsadaan.
- **Waxaad xaq u leedahay inaad ku hesho** warqad ahaan ama koobi elektaroonig ah arjiga SNAP.
- **Xaq waxa aad u leedahay in aad ogaato sababta,** aan si deg deg ah u socodsiin weynay codsigaada.
 - Soddon maalmood lacag caddaan ah, SNAP iyo kaalmada daryeelka ilmaha
 - Lixdan maalmood lacag caddaan ah oo la xiriirta naafonimada.
- **Xaq waxa aad u leedahay in aad ogaato xeerarka barnaamijyada ee** aad codsanayso iyo wakaalad ahaan waa in aan kuu sheegnaa sida manfacyadaada aan u xisaabinnay.
- **Xaq waxa aad u leedahay in aad xulatiid** meesha iyo qofka aad la dagayso
- **Kharashaadka.** Waxa aad xaq u leedahay inaad soo sheegto kharashaadka sida, hoyga, korontada, haynta ilmaha, masaariifta ilmaha ama kharashaadka caafimaad. Kharashyadani waxaa laga yaabaa inay saameeyaan caddadka nacfiyada SNAP ee aad hesho. Soo sheegid la'aanta ama Ama xaqiijin la'aanta qaarka mid ah kharashyada la qoray waxa ay noqon karaan in qoyskayaagu leeyahay ma doonayso in naga jaro kharashaadka aan la soo wada sheegin.

SNAP ka, waxaa dhici karta inaad racfaan aad ku qaadato **90-cisho gudahood** adigoo warqad u soo qoraya ama soo wacaya degmada ama Xafiiska Racfaanada ee Gobolka (State Appeals Office).

Hadii aad doonayso in gargaarkaagu uu sii socdo ilaa inta dacwada dhagaysigeeda laga gaarayo, waa inaad racfaan qaadataa ka hor waqtiga falal la soo jeediyey ama 10-cisho gudahood, ka dib waqtiga ogaysiiska hay'ada lagu soo diray, hadba labada kii dambeeya. Weydii shaqaalaha kiiska ee degmada ama qabaa'ilka in ay kuu sharaxaan sida wakhtiga racfaankaagu u saamayn karo kaalmadaada hadda ama mustaqbalka.

- **Helitaanka adeegyo sharci oo bilaash ah.** Kala xiriir shaqaalaha kiiskaaga wixii macluumaad ah ee ku saabsan adeegyada sharci ee bilaashka ah.
- **Xuquuqda racfaanka.** Haddii aadan ku qanacsanayn tallaabada la qaaday ama ay kula tahay in hay'addu aanay waxba ka qaban codsigaada gargaarka, racfaan ayaad ka qaadan kartaa. Gargaarada lacagta cadaanka ah, haynta ilmaha iyo daryeelada caafimaad ah waxaa aad ku qaadan kartaa racfaan ku **30-cisho gudahood** laga bilaabo maalinta aad ogaysiiska qoran ee degmada ama hay'ada qabiilka, ama waxa aad toos racfaan ugu dirsan kartaa Xafiiska Racfaanada ee Gobolka (State Appeals Office) ee Waaxda Adeega Bulshada ee Minnesota (Minnesota Department of Human Services), PO Box 64941, St. Paul, MN 55164-0941. (Haddii aad muujiso sababo jira oo racfaan aanad uga qaadanayn lacagtaada caddaanka iyo daryeelka **caafimaadka 30 cisho gudahood**, hay'addu waxay kaa aqbali kartaa **racfaan 90 cisho** gudahood, oo laga soo bilaabo maalinta aad heshay ogaysiiska).

Ogaysiiska Xuquuqda Madaniga

Takooridda sharciga ayay jabinaysaa. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS - Department of Human Services) kuguma takootrayso arrimo ku salaysan waxyaabaha soo socda:

- asalka
- caqiidada
- xaaladda caawinta bulshada
- naafonimada
- midabka
- diinta
- xaaladda guurka
- jinsiga
- asal qarameed
- jinsi doorashada
- da'da
- fikradda siyaasadeed

Cabooshinka Xuquuqda Madaniga

Xaq ayaad u leedahay inaad dacwad taakoorid xaraysatid haddii aad aaminsantahay in hay'dda adeegyada aadanaha si takoorid leh kugula dhqmeen.

Toos ula soo xariir **DHS** kaliya haddii aad qabto cabashada takooridda:

(Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga)
(Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota)
(Fursadaha loo Simanyahay iyo Helitaanka loo Simanyahay)

Civil Rights Coordinator

Minnesota Department of Human Services

Equal Opportunity and Access Division

P.O. Box 64997

St. Paul, MN 55164-0997

651-431-3040 (cod) ama isticmaal qadka isgaarsiinta aad doorbiddo

Waaxda Xuquuqda Aadanaha Minnesota (MDHR - Minnesota Department of Human Rights)

Minnesota dhexdeeda, xaq waxaad u leedahay inaad ka xarayso cabasho MDHR haddii aad rumaysantahay in laguugu takooray arrimaha soo socda:

- asalka
- jinsiga
- midabka
- jinsi doorashada
- asal qarameed
- xaaladda guurka
- diinta
- xaaladda caawinta bulshada
- caqiidada
- naafonimada

Toos ula soo xariir **MDHR** si aad u xarayso cabashada:

(Waaxda Xuquuqda Aadanaha Minnesota)

Minnesota Department of Human Rights

540 Fairview Avenue North, Suite 201

St. Paul, MN 55104

651-539-1100 (cod)

1-800-657-3704 (telefoon lacagla'aan)

711 or 1-800-627-3529 (MN Relay)

651-296-9042 (fakis)

Info.MDHR@state.mn.us (limeylka)

Waaxda Adeegyada Caafimaadka Aadanaha Maraykanka Xaafiiska Xuquuqda Madaniga (OCR - U.S. Department of Health and Human Services' Office of Civil Rights)

Xaq waxaad u leedahay inaad cabasho ka xarayso OCR, hay'adda federaalka, haddii aad rumaysantahay in laguugu takooray sababa la xariira arrimaha soo socda:

- asalka
- da'da
- diinta
- midabka
- naafonimada
- asal qarameed
- jinsiga

Toos ula soo xariir **OCR** si aad u xarayso cabashada: (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka Xaafiiska u qaabilsan Xuquuqda Madaniga)

Office for Civil Rights

U.S. Department of Health and Human Services

Midwest Region

233 N. Michigan Avenue, Suite 240

Chicago, IL 60601

Xarunta Jawaabcelinta Macaamiisha:

Khadka bilaashka ah: 1-800-368-1019

TDD Toll-free: 1-800-537-7697

limeylka: ocrmail@hhs.gov

Waaxda Beeraha ee Maraykanka

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho ka xarayso USDA, oo ah hay'ad federaal ah, haddii aad aaminsan tahay in ay sababta qowmiyada, midab,da'da, jinsi, asal qaran, naafonimo, caqiido diimeed ama mabda' siyaasadeed ay kugu takooreen maamulka SNAP.

Sida ku xusan sharuucda xaquuqda raayadka ee federalka iyo **Waaxda Beeraha ee Maraykanka (U.S. Department of Agriculture - USDA)**, sharciyaada raayadka iyo xeerarka, USDA, hay'adaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqalaheeda, iyo shirkadaha ka qeyb-qato barnaamijyada waxda ama bahiya barnaamijyada USDA waxa ka mabnuuc ah midab takoorida ku saleysan asalka, midabka, asal qarameed, jinsiga, diinta, naafonimada, da'da, fikrad siyaasadeed, ama ka aar goosasho ariimo la xidiida barnaamijyada madaniga ama howl aay maalgalisay ama qabatay hay'ada USDA.

Shaqsiyaadka naafonimada haysato ee u bahan qabaab kale in loola socodsiyo aqbaaradka barnaamijyada (tusaale ahaan, qoraalka dadka indhaha la', qoraal far waaweyn, cajalado, Luqada Maraykanka Dhegaha la' Lagula Hadlo [American Sign Language], i.w.m.), waa in aay la soo xiriran hay'ada (gobolka ama gudaha) meesha aay ka codsadeen caawimada dowlada. Shaqsiyada dhagoolada ah, maqalka ku adagyahay, ama hadalka naafada ka ah waxa aay la xiriri karan USDA iyaago u marayo Adeegyada Laliska Federaalka (Federal Relay Service) oo laga helo 1-800-877-8339. Sido kale aqbaaradka barnaamijka waxa laga yaaba in lagu qoro luuqado kale oo aan ahaan ingiriska.

Dacwo ku aadan midab takoorka si aad uga xareysid barnaamijka, soo buuxi Foomka Dacwadda Takooridda ee Barnaamijka USDA ([USDA Program Discrimination Complaint Form](http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html)) (AD-3027) ee lagu helo buugga internetka ee ah http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html ama xaafis waliba oo aay leedahay hay'ada USDA waxadna ku so qorta warqada aqbaarad dhaameystiran ee lagu codsaday foomka. Si aad u codsatid foomka dacwadda, waxad soo wacda 1-866-632-9992. Soo dir foomka oo ama waraqda u soo dir hay'ada USDA adigu ku so dirayo cinwaankan:

- (1) ku so dir: (Waaxda Beeraha ee Maraykanka)
(Xaafiska Caawiyaha Xoghayaha ee Xuquuqda Madaniga)
U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, DC 20250-9410;
- (2) fakis: 202-690-7442; or
- (3) iimeylka: program.intake@usda.gov

Hay'ada waa hay'ad bixiso fursado loo simaanyahay.